# Sawiradii mammogaraafi iga ma lagu arkin calaamado kansar

Calaamado muujinaya kansar ma lagu arkin sawiradii mammogaraafi iga ee lagaa qaaday

Barmaamijka Raajada Naasaha waxa lagu casuumaa dhammaan haweenka da'doodu tahay 50 ilaa 69 sanno si loogu sameeyo baadhitaanka mammogaraafi iga labadii sannoba hal mar. Haddii aad weli markaas jirto da'da loogu talogalay, waxaad labo sanno kadib heli doontaa casuumad cusub.

Haweenka ka weyn 70 sanno jir ma ku jiraan Barmaamijka Raajada Naasaha, laakiin waxa wacan inay weli ka feejignaadaan isbeddelo cusub oo ku yimaada naasaha hana la xidhiidhaan dhakhtarkooda haddii ay u baahanyihiin.

Mammogaraafi ga ma lagu ogaan karo dhammaan isbeddellada ku yimaada naasaha. Isla markaana kansarka naasaha ayaa la arki karaa muddooyinka u dhexeeya baadhitaannada.

Haddii aad isku aragto isbeddello, waa inaad la xidhiidho dhakhtarkaaga oo haddii loo baahdana laguu diro xarunta baadhista naasaha. Waa in sidaas la yeelo xataa haddii aad xilli dhaweyd aaday mammogaraafi ga.

Macluumaad kale oo ku saabsan Barmaamijka Raajada Naasaha waxaad ka helaysaa [kreftregisteret.no/mammografi](kreftregisteret.no/mammografi)

Salaan wacan

Solveig Hofvind

Solveig Hofvind,
madaxa Barmaamijka Raajada Naasaha